

# OGEYSIISKA SANADLAHA AH

## **Ogeysiiska Sunta Asbestos ee Sanadlaha ah**

Gudoonka Waxbarashada Degaanka St. Cloud (St. Cloud Area School District) wuxuu leeyahay baaritaan adag iyo barnaamij maamula dhamaan dhismayaasha ay sunta asbestos ku jirto qalabkooda. Intii karaankeena ah, gudoonka waxbarashadu wuxu u sameeyaa dhalinyarada jaaliyadda iyo shaqaalahaba goob badbaado iyo caafimaad qab leh. Sadexdii sano ee kasta dhismayaasha ay leedahay ama kuwa u kireysan gudoonka waxbarashada dhamaantood dib ayey baaritaan ugu sameysaa hay'ad EPA shati ka heysata oo baarta sunta asbestos. Lix bilood ee kasta, alaabaha/waxyaalaha ay ku jirto sunta asbestos waa la eegaa. Shey kasta ee u baahan in la hagaajiyo waa la hagaajiyaa kii u baahan in la tuurana waa la tuuraa iyada oo la raacayo habkeena shaqo ee barnaamijka hagaajinta asbestos si badbaado iyo mas'uuliyadi ay ku jirto ah loo sameeyo. Gudoonka Waxbarashada Degaanka St. Cloud (St. Cloud Area School District) wuxuu heystaa liis ah goobaha iyo noocyada ay yaalaan alaabo ay ku jirto sunta asbestos ee dhismayaasheena. Nuqul ah qorshaheena maamulidda sunta asbestos ayaad ka heli kartaa xafiiska Health & Safety (Caafimaadka & Badbaadada) si aad u muraajaceyso. Wixii su'aalo ah ee ku saabsan qorshaha waxaa la weydiin karaa Mike Machacek oo xafiiskiisu ku yaalo District Services Building (Dhismaha Adeegyada Gudoonka Waxbarashada).